

Amarka lamba. 12 rep.

Dhismaha Golaha Caafimaadka ee Soomaaliya.

MAMULKA WASAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA
MAAMULAHAD

Marka uu arkay xeerka 8 Feb. 1950, lamba.12 ee ku saabsan qabashada xilka Maamulka Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya;

Marka uu arkay dekereetada Madaweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya ee taariikhda 31 Maarsio 1950;

Marka uu arkay amarka lr.5 ee 1950 oo kaasoo Dalka ka jira — iyadoo la dabbaqi karo — xeerarka kuwooda Sharciga Caafimaadka oo la meelmariyay 20 Maarsio 1933, lr. 702;

Marka uu garowsaday in ay habboontahay, marka la eeg xaaladda isbaddashay oo ay keentay kala duwanaanshaha xeerarka sharciga la soo sheegay marka loo eego waxaa khuseeya laanta/hay'adda la-talinta maxalliga ee arrimaha caafimaadka, iyo la dhisayo Golaha Caafimaad oo xilkoodu yahay in ay darsaan qorshayaasha lagu horumarinayo abaabulka adegyada caafimaadka Dalka iyo inay katala dhiibtaan dhibaatooyinka leh dabeeecadda caafimaadka oo ay tahay in laga baaraandego;

Marka uu garowsaday in ay tahay in loo yeero dhinacyada saraakiisha maamulka laamahaas iyo farsama-yaqaanada, sidoo kale wakiil ka socda dadka deggan waddanka.

Marka uu dhagaystay Golaha Dalka;

WUXUU SOO SAARAYAA AMARKAAN

Qod. 1

Waxaa la dhisay Golaha Caafimaadka ee Dawladda oo xaruntiisu ay tahay Muqdisho, wuxuuna u xilsaranyahay in uu sameeyo daraasado iyo in uu tala ka keeno qorsheyaasha ku lug leh abaabulka caafimaadka Dalka.

Qod. 2

Golaha Caafimaadku wuxuu ka koobanyahay:

Madaxa Xaafiiska Caafimaadka iyo Waxbarashasa Dadweynaha Guddoomiye

Kormeeraha Caafimaadka

Madaxweyne

Kormeeraha Xannaanada Xoolaha

Xubin

Wakiil ka socda Xaafiiska Arrimaha Gudaha

"

Madaxa Qaybta Caafimaadka Ciidamada

"

Agaasimaha Isbitaalka "De Martino"

"

Shaqli waddani ah oo uu soo magacaabo sanad kasta Maamulaha

"

Xilka xoghaynta waxaa qabanaya sarkaal ka tirsan Xaafiiska Caafimaadka iyo Waxbarashada Dadweynaha.

Qod. 3

Kulamada Golaha Caafimaadka waxaa loogu yeeri karaa in ay ka qaybgalaan si ku-meelgaara, qaraar uu Guddoomiyuhu garo, wakiillo Xaafiisyo kale, marka laga doodayo mowduucyo xilalkooda ku lug leh.

Qod. 4

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa marka lagu baahiyoo Fafinta Rasmiga ee A.F.I.S.

Muqdisho, 30 Juun 1951.

Maamulaha

Gorini